



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**  
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**  
**Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 6-aad**

**Documentiga kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:24-aad**

**Tr:28.07.2015**

---

**Kalfadhiga 6-aad**

**Kulankiisa:24-aad,sacad furitan.1:14 gh, sacada xiritanka.1:31 gd.**

**Guntinta:158 xildhibaan**

**Ajendaha:**

**1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**

**2.Ansixinta Ajendaha**

**3.Warbixinta Guddi Hoosaadka Talo Bixinta Jiheynta Hiigsiga 2016**

**Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya**

**Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari**

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya

Mudane:Muxamed sheikh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu xildhibaanada ka codsaday in ay ansixiyaan ajendaha xildhibaanada wey ansixiyeen.

**Xildhibaan:Aadan Saran Soor**,wuxuu soo jeediyay,qaraarkan shalay ayaa laga dooday ka dib waxaa la yiri cod haloo qado waxaa la yiri hala soo tiriyay xildhi

baanadii golaha fadhiyay kooramkii ayaa dhamaan waayay waxaa lagu balamay in manta cod loo qaado sidas daraded ajendaha waa in uu noqda codayntii shalay baaqatay.

**Guddoomiyaha Golaha**,wuxuu soo jeediyay,waxaan idiin sheegaya waxaan mareyna marxalad xasaasi ah waxa loo bahan yahay daganasho waa in aan is maqalnaa ma ogolan karno waxyabo ka hor imanayo qaranka iyo buuq xildhibanada waa in ay u shaqeyan si Dimoqradi ah, go'anada la gaaray iyo sababta lo garay hada aya la shegaya.

**Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu u yeray guddoomiyaha guddi hoosadka.**

**Xildhibaan:C/laahi Goodax Bare**,wuxuu sheegey,sida laga warqabo guddi hoosadkii 25 ka ahaa waxey la shiran golaha wasiirada oo ay hor dhigen go'aankii ay soo garen guddi hoosadka taloyin iyo wadatashi labada gole oo hor socda Rai'sal wasaaraha waxan isku racney islana garaney 3 qodob.

a) Hal qof hal cod aysan dhici Karin

b) In wada tashi ay yeeshan heer federaal iyo heer goboleed iyo ururada bulshada

c) Wuxuu socon doona ilaa 2016ka

Rai'sal wasaaraha wuxuu u yimid sakey in uu Golaha Shacabka ka hor hadlo.

**Guddoomiyaha Golaha,wuxu ku so dhaweyay Rai'sal Wasaaraha J.F.Soomaliya**

- **Mudane:Cumar Cabdirashiid Cali Sharma'arke**,wuxuu soo jeediyay,waxa la maraya waqti xasaasi ah waxaa loo bahan yahay wada tashi,waxan idiinku imid in aan idiin gelsho kalsoni,hal qof hal cod in aysan dhici karin waxaan ku meel mari karna anago mid ah oo ka wada tashano masiirka dalka iyo axdiga qaranka soomaaliyeed,wada tashiga uu she gayay xildhibaan:Godax guddiga iyo golaha wasiirada ayantan wada hadal ayaa u socday, bari shirka qabsomaya iyo ajendihisa sidedaba in aan cadeeyo waxan isla garan ama isla meel dhigin in an marnaba geynin arintan an hada ka dhawajiyay oo ah 3qodob, in wada tashigas lagu soo gunanado sadaxdas an u cadeyno besha calamka iyo umada soomaaliyeed meesha lala aadi laha,waxan mareyna waqti xasasi ah waxan wax ku noqon karna marka labada gole ay wada

socdan,wada tashtan,kalsooni isku qaban,ayan wax ku noqon karna, KMG wan ka baxnay waxa noo harsan in aan Dastuurka ka bixino KMG, waxa no harsan dowlad goboleedyada inta dhiman in la dhiso hadii wada tashi iyo wada shaqeyn joogta ah la sameyn, waxa laga yaba dadkii wax naga sugayay in ay na arkan anagoo kala hadleyno oo kala socono,lakin waxa aasas ah in umada soomaaliyeed an tusno anago wada shaqeynayna taas aya tusaale ah in wixii an isku afgarano meel mari karan waa in aad kalsooni qabtan inta aan sheegnay ayuu ku imaan karaa dalka masiirkiisa.

Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa:24-aad,uu Shir Guddoominayay Guddoomi yaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari uu sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey aheyd 1:31 gd.